# Barnaamijka Waxbarashada Balaadhinta EdChoice (EdChoice Expansion Scholarship Program) Xaashida Xaqiiqda 2025-2026

## WAA MAXAY BARNAAMIJKA DEEQDA BALAARINTA DUGSIGA (EDCHOICE EXPANSION SCHOLARSHIP) OHIO?

Barnaamijka Balaarinta Deeqda Waxbarashada EdChoice waxa uu bixiyaa deeqo waxbarasho oo gobolku siiyo caruurta xanaanada ilaa fasalka laba iyo tobnaad kuwaas oo degan Ohio iyadoo lagu salaynayo heerka dakhliga qoyska. Deeqda waxbarasho waa in loo adeegsadaa waxbarashada si loo dhigto dugsiyada gaarka ah ee ka qayb qaadanaya.

## YAA U QALMA BALAARINTA EDCHOICE (EDCHOICE EXPANSION)?

Balaadhinta EdChoice waa barnaamij dakhli ku salaysan oo ay heli karaan ardayda ku jirta xanaanada ilaa fasalka laba iyo tobnaad kuwaas oo aan u qalmin barnaamijka deeqda waxbarasho ee Cleveland.

Deeqaha waxbarasho ee Balaarinta EdChoice waxaa la bixiyaa iyadoo lagu salaynayo dakhliga qoyska. Haddii dakhliga qoyska uu yahay ama ka hooseeyo 450 boqolkiiba Heerka Saboolnimada Federaalka, waxaa la siin doonaa lacagta deeqda waxbarasho ee ugu badan. Haddii dakhliga qoyska qoyska uu yahay ama ka badan yahay 451 boqolkiiba Heerka Saboolnimada Federaalka, deeqda waxbarasho ee ardayga waa la dhimay.  Shaxda hoose waxay ka tarjumaysaa qaybinta abaalmarinada ee boqolleyda Heerka Saboolnimada Federaal kasta.






Department of Education & Workforce

## WAA GORMA WAKHTIGA QOYSKA CODSAN KARO?

Muddada codsiga ee **Waxbarashada Balaarinta EdChoice**barnaamijku waxa uu furmayaa 1da Feebaraayo, 2025, waxana uu sii furnaan doonaa ilaa 30ka Juun, 2026. Qoysasku waa inay la xiriiraan dugsiga gaarka ah ee ka qaybgalaya oo ay dhammaystiraan nidaamka diiwaangelinta/ oggolaanshaha dugsigaas. Marka la aqbalo diiwaangelinta dugsiga gaarka ah ee ka qaybqaata, qoysasku waxay dooran karaan inay buuxiyaan arjiga deeqda waxbarasho ee EdChoice, kaas oo uu soo gudbin doono dugsiga gaarka loo leeyahay iyada oo loo marayo nidaamka arjiga onlaynka ah ee sugan.

## WAA MAXAY MACLUUMAADKA LOO BAAHAN YAHAY SI LOO CODSADO DEEQDA WAXBARASHO?

Waalidiinta waxay siin doonaan dugsiga gaarka loo leeyahay nuqul ka mid ah shahaadada dhalashada ee ardayga, nuqul caddaynta ciwaanka ee hadda iyo Foomka Codsiga Deeqda Waxbarasho si loo codsado deeqda waxbarasho. Macluumaad dheeraad ah sida kaarka warbixinta ardayga, warqadda nootaayyada, dukumeentiga haynta ama macluumaadka daryeelka korinta ayaa loo baahan karaa si loo go'aamiyo u-qalmitaanka ardayga deeq waxbarasho.

*FIIRO GAAR AH: Marka lagu daro codsiga dugsiga, codsadayaasha cusub ee EdChoice Expansion waxay u baahan doonaan inay dhamaystiraan nidaamka xaqiijinta dakhliga, ilaa qoysku lahaan jirin dakhli hore oo qoyska ah oo fayl ah. Xaqiijinta daqliga waa ikhtiyaarka codsiyada dib u cusboonaysiinta ee barnaamijka Deeqda Waxbarashada Ballaarinta EdChoice. Qoysaska cusboonaysiinta uma baahna inay dhamaystiraan cadayn dakhli cusub sanad kasta. Hadii dakhliga qoyskaaga ama tirada qoyskaaga uu is bedelo, qoysasku waxay soo gudbin karaan arjiga cadaynta dakhliga cusub sanad dugsiyeedka soo socda. Qoysaska codsanaya heerka dakhligoodu hooseeyo waa inay soo gudbiyaan dakhliga qoyska cusub sanadkii. Dakhliga Qoyska dib loo xisaabin maayo ka dib marka dib u eegista la dhameeyo.*

## WAA MAXAY QIIMAHA DEEQDA WAXBARASHO?

Deeqaha waxbarasho ee ugu badan ee ardayda fasalada K-8 hadda waa $6,166 iyo $8,408 ee fasalada 9-12. Qadarka arday kasta helaya way kala duwan tahay iyadoo lagu saleynayo dakhliga qoyska. Qiyaasaha abaalmarineed ee gaarka ahwaxaa laga heli karaa foomka xaashida ee webseytka Waaxda.

*FIIRO GAAR AH: Codsi kasta oo la soo gudbiyo kadib 14ka Oktoobar, 2025, waxaa lagu abaalmarin doonaa qaddar go'an oo ku salaysan inta sannad dugsiyeedka ka hadhsan taariikhda ardaygu ku biiray dugsiga gaarka loo leeyahay.*

## WAALIDKA/MAS'UULKA MA BIXIN DOONAAN WAX QADAR LACAG AH?

Qadarka deeqda waxbarasho waxa kaliya oo loo isticmaali karaa waxbarashada. Waalidiinta iyo/ama dadka masuulka ka ah ayaa weli laga yaabaa inay bixiyaan kharashka diiwaangelinta, kharashka alaabta iyo noocyada kale ee kharashyada la midka ah. Haddii waxbarashada dugsiga gaarka loo leeyahay ay ka sarreyso qaddarka deeqda waxbarasho ee EdChoice oo qoysku aanu u qalmin heerka dakhliga hoose, qoyska ayaa laga yaabaa inay bixiyaan farqiga u dhexeeya. Si kastaba ha ahaatee, qoysaska u qalma heerka dakhligoodu hooseeyo ma aha inay bixiyaan wax lacag ah oo aan lagu daboolin deeqda waxbarasho. Si qoyska loogu tixgaliyo xaalad dakhligoodu hooseeyo, qoysku waa inay dakhligooda qoyskooda u soo gudbiyaan sannadkiiba Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha.

## SIDEE WAALIDKA/MAS'UULKA LOOGU OGEYSIIN DOONAA XAALADDA CODSIGA?

Macluumaadka codsiga waxaa dib loo eegi doonaa 14 maalmood gudahood. Dugsiga gaarka loo leeyahay waxaa lagu wargelin doonaa 14 maalmood gudahood haddii khaladaad ama cillado la arko. Fadlan la xidhiidh dugsiga gaarka ah wixii su'aalo ah ee ku saabsan codsiga. Bixinta deeqaha waxbarasho ayaa la samayn doonaa si xilliyo ah waxaana warqad abaal-marin ah iyo foomka aqbalaadda loo diri doonaa waalidka/masuulka. Waalidiinta/mas'uuliyiinta waxay la socon karaan codsiyada ardaygooda iyada oo loo adeegsanayo boga onlaynka ah ee waalidka.

## MA LA CUSBOONAYSIN KARAA DEEQDA WAXBARASHADA BAALINTA EDCHICE (EDCHOICE EXPANSION SCHOLARSHIP)?

Haa, deeqda waxbarasho waa la cusboonaysiin karaa sannad kasta ilaa fasalka 12 ilaa inta ardaygu:

1. Wuxuu qaadaa dhammaan qiimaynaha loo baahan yahay;
2. Uusan haysan in ka badan 20 maqnaansho cudurdaar la'aan ah sannad dugsiyeedka; iyo
3. Wali degan yahay Ohio.

## XAGEEN KA HELI KARAA MACLUUMAAD DHEERAAD AH?

K hel macluumaad dheeraad ahoo ku saabsan EdChoice Expansion mareegta Waaxda ama la xidhiidh edchoice@education.ohio.gov.

Barnaamijka Deeqda Waxbarasho iyo Waxbarashada ee Cleveland ayaa wali diyaar u ah dadka degan Cleveland Municipal School District. Ka hel macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka Cleveland webseytka Waaxda.

*Waaxda Waxbarashada iyo Xoogsatada Ohio(Ohio Department of Education and Workforce) kuma takoorto shakhsiyaadka hab ku salaysan isir, diin, lab iyo dhedig, dhalasho, da', naafo, ama asal qowmiyadeed. Waaxda Waxbarashada iyo Xoogsatada Ohio waa loo-shaqeeye fursad siman iyo bixiye adeegyada ADA. Ogeysiiska Takoor La'aanta Waaxda waxay khusaysaa dhammaan barnaamijyada iyo hawlaha.*

*Eeg Nidaamka Xeerka Takooridda Naafadaee iyo Xeerka Cabashada Takooridda ee Waaxda. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ogeysiiska takoor-la'aanta, booqo ocrcas.ed.gov/contact-ocr si aad u heshid ciwaanka iyo lambarka talefoonka xafiiska u adeega degaankaga, ama wac 1-800-421-3481.*



Department of Education & Workforce